**Xeerka 30 Jannaayo 1957, lamba. 15 rep.**

**Xuquuqda iyo kharashka Garsoorka**

**MAAMULAHA**

Marka uu arkay Xeerka 7 Maajo 1956, lamba. 1: "Dhismaha Xukuumadda Soomaaliya";

Marka uu arkay dekereetada 18 Maajo 1956, lamba. 78 "Sharciga XukuumaddaSoomaalia

Marka uu arkay Xeerka nidaamka Garsoorka oo lagu meelmariyay Amarka 2 Feberaayo 1956, lamba. 5;

Marka uu tixgaliyay baahida loo qabo in la so saaro sharci lagu fulinayo iyo lagu midaynayo Sharciga la soo sheegay wixii ku saabsan arrimaha kharashka iyo xuquuqda garsoorka;

Marka uu arkay qod. 118 e isla Xeerka Nidaamka Garsoorka;

Marka u dhagaystay Golaha Wasiirada

Soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Maaliyadda;

**WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA**

**Qod. 1**

Waxaa la meelmariyay sharciga ku sabsan xuquuqda iyo kharashka garsoorka oo dekereetadaan ku lifaaqan.

**Qod. 2**

Waxaa la samaynayaaa, haddii loo baaho, in laga baddalo miisaaniyaadda si loo mideeyo qoondaynta cutubka 84, oo ku saabsan hawl-socodsiinta kharashka adeegyada maxkamadaha iyo kharashka garsoorka.

Muqdisho, 30 Jannaayo 1957.

P. Maamulaha

**P. Franca**

**Cabdullaahi Ciise Maxamuud**

**Salaad Cabdi Maxamuud**

Lagu sugay lamba. 13, 31 Jannaayo 1957.

Madaxa Xisaabadka: **Tura**

La sugay lana Diiwaangeliyay Diw. – lamba. 1, bogga 74.

Muqdisho 30 Jannaayo 57

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**

## XUKUUMADDA SOOMAALIYA

## SHARCIGA KU SAABSAN KHARASHKA GARSOORKA

### Cutubka I

Kharashka Garsoorka

### Qod. 1
### Gunnada Markhaatiyada

Maalin kasta oo safarka ama maalin joogga goob ay tahay in la eego, markhaatiga waxaa u sugnaaaday deggan goob u jirta deegaankooda 5 Km. gunno ah 5 Sh. haddii markhaatigu u yahay mid ka yar 14 sano ama qof qaba itaal darro culus, gunnada xitaa waxa la sinayaa waalida ama qofka ka masuulka ah.

Haddii markhaatigu uu ka imaanayo goob aan gaadiidka dadweynaha aan lagula xariiri karin, maalin kasta oo safara waxaa loo xisaabinaya gunnadaas socodka 30 km, iyado meesha laga saarayo jajabka ka yar 15 km.

Marka ay jirta xaaladda faqradda la soo shegay wxi ku saabsan 30 km, hasyeeshe ka badan 15 Km, waxaa la xisaabinaya gunno hal maalin keliya.

### Qod. 2

Kuwa adegsanaya markab waxaa loo celinayaa kharashka safarka qaybta saddexaad oo ay ku jirto cuntada. Markaaso kale waxaa la siinayaa gunnada safarka ay badda ku soo galeen. Haddii la isticmaalay qalab kale ee gaadiid , markhaatiga waxaa loo celinayaa kharashka safarka uu soo galay iadoo lagu salaynayo qiimaha ka jira ee loo adeegsado dhaqaalaha. Xaalad kasta oo jirta markhaatigu lama siin karo wax ka badan Sh. So 0,08 halkii km. ee uu soo socdo.

### Qod. 3

Halwlgal kasta oo masuulinta garsoorka ay weydiistaan oo muddada ay soconayso aanay ka badnayn laba saacadood, oo ay ku jirto warbixinta, waxaa lagu bixinayaa lacagta fasaxa halbeegga soo socda:

1) dhaqaatiirta – kuwa qallinka, injineerada, dhaqaatiirta kiimikada iyo culuunta sayniska kale, waxaa la siinayaa gunno go’an oo ah: . . . Sh.So 10
2) xisaabiyaasha, jowmitarada, iyo farsamayaqanada kale . . Sh. So. 8
3) khuburada kale oo aanay ku jirin kuwa kor lagu soo shegay . . Sh. So. 6

Hawlgalada kale oo u baahan waqti ka badan laba saaacadood, khabiir kasta waxaa la sinayaa, saacad kasta oo dheeraada kala bar abaalgudka kor lagu soo sheegay. Maalin kasta, khabiirku lama siin karo wax ka badan saddex fasax. Wixii ku saabsan warbixinada u baahaan daraasaad gaara ama baaris kasta oo aan si tifatiran loo caddayn, masuulinta garsoorka ayaa go’aan ka gaaraya abaalgudka kolba sida xaalku yahay. Dhaqaatiirta – kuwa qalliinka wixii ku saabsan jeexidda meydka aan la duugin xushmadu waa Sh. So 25; wixii ku saabsan jeexidda meydka la duugay xushmadu waa Sh. So. 50. Khubarada ka tirsan Maamulka xuquuqda la soo shegay waxaa laga dhigayaa kala bar.

### Qod. 4

Khubarada aan ka tirsanayn Maamulka Dawladda oo loo diro meel ka baxsan deegaankooda, ka sokow in kharashka safarka loo celiyo, waxaa u sugnaatay marka laga reebo arrinta ku xusan qod. 2 gunno maalin kasta ee safar habeen dhax, halbeegga soo socda:

— khubarada ku xusan lamba. 1) ee qod. kore ee 3) . . . Sh. So. 12;
— khubarada ku xusan lamba. 2) ee qod. kore ee 3) . . . Sh. So. 8;
— khubarada ku xusan lamba. 3) ee qod. kore ee 3) . . . Sh. So. 6.

Khubarada shaqaalaha Maamulka dawladda waxaa u sugnaatay keliya gunnada shaqada xilgudashada iyo geediga si waafaqsan qod. 7 ee soo socda.

**Qod. 5**

Ka sokow gunnada kor lagu soo sheegay waxaa la gudayaa, marka ay khubaradu si qeexan u codsadaan kharashka ay ku galeen fulinta baarista oo maxkamadu u aragto mid caqligala.

**Qod. 6**

Turjubaanada aan shaqada ka hayn xaafiisyada maxkamadaha waxaa u sugnaatay dhaqaalaha loo jideeyay khuburada ee ku xusan lamba. 2 ee qod. 3.

**Qod. 7**
**Masuulinta iyo Saraakiisha Garsoorka**

Masuulinta garsoorkaa, kaaliyeyaasha iyo gaarsiiyeyasha, oo gudanaya hawlo la xariira shaqadooda oo ay tahay in ay tagaan meel ka baxsan xaruntooda waxay xaq u leeyihiin in loo celiyo kharashka ay galeen iyo sidoo kale gunnada hawsha ay qabteen iyo geediga ee loo jideeyay darajada ay haystaan, sida ay qabaan xeerarka jira.

**Qod. 8**
**Garsoorayasha Dadweynaha Maxkamadaha Dambiyada Culus**

Garsoorayaasha Dadweynaha ee Maxkamadaha Dambiyada culus, waxay xaq u leeyihiin maalin kasta ay dacwad galaan gunno ah Sh. So 12.

Garsoorayaasha dadweynaha ee shaqaalaha Dawladda ka tirsan waxay xaq u leeyihiin gunnadaas kala barkeed.

Haddii ay deggnyihiin meel ka baxsan Km. 5 goobta dacwaddu ka dhacayso, garsooryaasha dadweynaha aan ahayn shaqaalaha Dawladda, waxay xaq u leeyiiin kharashka safarka ay ku soo galeen iyo gunno ah Sh. So. 20 maalin kasta oo ay safar galaan iyo habeen dhaxa , marka laga reebo arrinta ku xusan qod. 2. Garsoorayaasha Dadweyne ka tirsanayn Maamulka Dawladda waxay helayaan dhaqaalaha ku xusan qod. 7.

**Qod. 9**

Kharash celinta iyo bixinta gunnada ee ku xusan cutubka kore waxaa lagu bixinayaa amarrada Masuulinta Garsoorka ee guddoominaya dacwadda iyo dacwad oogaha. Amarrada ay soo saaraan Masulinta Garsoorka Muqdisho waa kuwa laga qaadan karo Xaafiiska Canshuuraha Beeriga, kuwa soo saaray Masuliinta daafaha, waxaa laga bixin karaa Guddoomiyeyaashooda Degmooyinka.

**Cutubka II**

Xuquuqda Caddaaldda

**Qod. 10**

Xuquuqda qoraallada gaarsiiyeyaasha iyo kaaliyeyaasha waxaa ku cadyihiin qodobada 5 iyo 6 D. L. lamba. 1 ee 23 Maarso 1956.

**Qod. 11**

Arrimaha madaniga dhinacyadu – haddii aan loo oggolaan in dayn ahaan laga ballamay – waa in ay soo hormariyaan kharashka iyo xuquuqda ku xusan qodobada kore. Arrimaha ciqaabta, gunnada iyo kharshaadka kale ee ku xusan qodobada kore waxaa soo hormarinaya Maamulka Dawladda.

**Qod. 12**

Qaadista kharashka iyo xuquuqda kale ee lagu soo sheegay qodobada sare iyo wixii ganaaxyo ah waxaa u xilsaaran kaaliyaha.

Haddii Dayn-qabayaashu ay lacagta laga rabay ay bixin waayaan, kaaliyuhu waa in uu u diraa digniin ay lacagta ku bixiyaan, taasoo ay ku caddahay liistada lacagta la soo hormarinayo iyo xuquuqda laga doonayo, sidoo kale canshuurta ku xusan D. L. ee 23 Maarso 1956, kolba sida garsooruhu xaq-gudidda u soo sameeyo.

Digniintaasu waa in lagu sheegaa muddada lacagta lagu soo xareynayo, marka ay muddadaasu dhammaato waxaa lagu socodsiinayaa fulin qasab ah.

Lacagta la soo xareeyo oo Kaaliyuhu uu liista gaara ka sameeyo, waa in loo gudbiyaa Xaafiska canshuuraha Berriga.

**Qod. 13**

Kharashka, canshuurta iyo xuquuqda garsoorka looma baddali karo ciqaab xarig ah.

**Qod. 14**

Haddi ay dhacdo lacag la'aan, oo lagu soo xaqiijiyo caddayn uu keeno gaarsiiyayaha socodsiinaya fulintaiyo xitaa masuulinta degmada iyo boliiska, kaaliyaha u xilsaaran xareynta lacagta waa in uu ku cel-celiyaa waqtiyo kale xaqiijinta ku saabsan xaaladda lacag la'aanta dayn-qabayaasha, si aanay u dhicin xaq-dhac.

**Qod. 15**

Kaaliyeyaasha xaafiisyada garsoorka ee gacanta ku haya xaraynta lacagaha ganaaxa iyo kharashka xuquuqda garsoorka, iyo sidoo kale lacagaha dayn ahaan laga ballamay ee muunadda musalifnimada, waxaa u sugnaatay boqolkiiba labaatan lacagaha ay u soo xareeyaan Maamulka. Sidoo kale waxaa u sugnaatay boqolleyda la soo sheegay dhammaan lacagaha xaraashka ah iyo kuwa laga helay iibka waxyaabaha dambi muujinta.

Caddadka lacagta lagu soo sheegay faqradda kore iyo xuquuqda ku xusan qod. 10 waa daqli ay eedahay kaalinta.

Daqliga la uruuriyay laba biloodlaha marka hore waxaa laga bixinaya qayb ah boqolkiiba toban, marka uu ku soo taliyo madaxa kaalinta iyo go'aanka aan laga doodi karin ee Madaxa Xaafiiska garsoorka, waxaana lo qaybinayaa shaqaalaha karaaniyeyaasha sida nidaamsan uga hawlgala xaafiisyadooda garsoorka.

Ka sokow qaybta lacagta laga bixinayo ee ku xusan faqradda kore Kaalinta Maxkamadda Gobolka Banaadir waxay ka bixinaysaa qaybta daqliga ee laba biloodlaha Sh. So. 300 oo la siinayo Madaxa Kaalinta Maxkamadda Sare, taaso sababaysan, iyado wax qaybsiga aanay ku jirin daqliga xaafiiskiisa.

**Qod. 16**

Qaybsiga daqliga ka soo baxa ka dib bixinta ku xusan qodobka kore waxaa la sameeynayaa labadii bilodba mar, waxaana u xilsaaraan madaxa kaalinta oo qoraalka laga sameeyo uu hubinayo Madaxa Xaafiiska garsoorka, iyadoo si islaeg loogu qaybinayo dhammaan kaaliyaasha xaafiisyadooda garsoorka ka hawlgala. Qaybta u sugnaatay kaaliyaha u madaxda ah waxaa loo xisaabinayaa laba jibbaar marka loo eego xaqsiinta xaqlayaasha kale. Kaaliyeyaasha madaxda ah ma qaadan karaan laba iloodle kasta qayb ka badan Sh. So. 300, kaaliyesha kale iyaguna ma dhaafi karaan laba-biloodle kasta isla cinwaankaas lacag ka badan Sh. So. 200.

Wixii soo hara Kaalintu waa in ay u gudbisaa Xaafiiska Canshuuraha Berriga ee Muqdisho.

Kaaliyeyaasha ka tirsan Xaafiiska Xeer Ilaalinta waxay ka qaybqadanayaan qaybsiga daqliga Xaafiiska Kaalinta Garsooraha Goolka Banaadir.

**Qod. 17**

Gaarsiiyeyaasha waxaa u sugnaaday:

a) tobankiiba hal lacagata laga helay kharashka garsoorka ee ah lacagta ganaaxa;
b) tobankiiba hal xuquuqda ku xusqn qod. 10 wixii ah arrimaha iqtisaskooda. lama qaadan.

Karaan qayb ka badan laba-biloodle kasta lacag ka badan Sh. So. 200. Wixii lacag soo hara sida ku xusan qodobka kore madaxa kaalinta garsoorka waa in uu gudbiyaa. Dakhliga u sugnaaday gaarsiiyeyaasha laguma xisaabinayo kuwa kaaliyeyaasha xitaa labada xil haddii isku qof uu qabtay.

**Qod. 18**

Qaybsiga daqliga looma tixgalinayo kuwa jooga kaaliyeyaasha iyo gaarsiiyeyaasha fasaxa aan cadiga ahayn ku jira ama kuwa ku jira sugitaanka.

**Qod. 19**

Curaarta ay dhinacyada ay soo dhigaan si waafaqsan qod. 11 waxaa lagu si haynayaa kaalintoodi ilaa si kama dambaysa loo tirinayo.

Wixii curaar kale ee dammaanad ah ama cayn iyo kuwa ku xusan Xeerka Nidaamka Garsoorka ee ku saabsan cabashada Maxkamadda Sare si gaar ahaneed waxaa fulinaya kaaliyihii qabtay, oo geynayaa xaafiisyada boostada.

**Cutubka III**

Shuruucda ay Wadaagaan Cutubyada Kore

**Qod. 20**

Marka la dabbaqayo dekereetadaan waa inlo hoggaansamaa axkaamtaa u degsan arrimaha canshuurta shaabadda iyo diwaanka ee D. L. lamba. 1 ee 23 Maarso 1956, iyo wixii axkaam kale ee jira oo leh dabeecad canshuureed.

**Qod. 21**

Xeerarkaan waxaa loo hoggaansamayaa xitaa, iyadoo lagu dabbaqayo dacwadaha horyaalla Maxkamadaha Ciidamada ee Soomaaliya.

**Qod. 22**

Dekereetadaaan laguma dabbaqayo dacwadaha horyaalla Qalliyada iyo Maxamadda Qaalliga.

**Qod. 23**

Dekereetda 29 Juun 1951, lamba. 70 waa la naqliyay.

P. Maamulaha

**P. Franco**

**Cabdullaahi Ciise Maxamuud**

**Salaad Cbdi Maxamuud**